STATE OF WASHINGTON
DEPARTMENT OF SOCIAL AND HEALTH SERVICES
DIVISION OF CHILD SUPPORT (DCS)

# Codsiga Dib-u Eegista Amarka Taakulaynta Ilmaha
## Child Support Order Review Request

KU SOCOTO:

KHUSAYSA:

LAMBARKA DACWADA:

TAARIIKH:

**Macluumaadka Barnaamijka**

Waxaad waydiisatay Qaybta Taakulaynta Ilmaha (DCS) in ay wax ka badesho ama ay isku hagaajiso amarka Taakulaynta ilmahaaga. Waxaad haysataa labo ikhtiyaar uu kugu caawinaya in aad wax ka badeshid ama aad isku hagaajisid amarkaaga:

1. Ka soo gudbi tallaabo maxkamadda si aad wax uga badeshid amarkaaga. Waxaad sidaasi sameyn kartaa kaligaaga ama adigoo u soo maraya qareen.
2. Wayddii DCS in ay dib-u eegis ku sameyso amarkaaga.
   a. DCS kuma matali karto ama ma siin karto talo sharci adiga ama dhinaca kale ee amarkaaga.
   b. DCS waxay dib-u eegis ku sameynaysaa macluumaadkaaga.
      (1) Haddii amarkaaga **uusan gaarsiisanyan** aasaaska ugu yar ee dib-u eegista, DCS wax dheeraad ah ma sameynayso.
      (2) Haddii amarkaaga **uusan** gaarsiisanayn aasaaska ugu yar ee dib-u eegista, DCS waxay u diraysaa dacwadaada xafiiska Xeer-ilaaliyaha Degmada ama ha'yad dhallaanka taageerto kale (sida loogu baahdo) wax ka badelidda iyo isku hagaajinta. Shuruudaha ugu yar waa:
         (a) DCS waa in ay hayso macluumaadka cinwaanka hadda la joogo ee labada dhinac ee amarka.
         (b) Gobolka Washington waa in uu leeyahay awoodda maamul ee labada dhinac ee amarka.
         (c) Ugu yaraan seddax sanno ayaa laga soo gudbay taniyo markii ugu danbeysay ee tirada taakulaynta la dejiyay **ama** waxaad muujin kartaa isbaddel adag oo ku yimaaday duruufaha. Shuruuddan lama adeegsan karo haddii dib-u-eegista la codsaday ay sabab u tahay in waalidka aan ilmaha hayn la xiray.
         (d) Isugeynta tirada taakulaynta ee amarka hadda jira waa in uu ugu yaraan ka badnaadaa boqolkiiba 15 ama uu ka yarraadaa tirada lagu caddeeyay ***Jadwalka Taakulaynta Ilmaha ee Gobolka Washington*** ee hadda. Shuruuddan lama adeegsan karo haddii dib-u-eegista la codsaday ay sabab u tahay in waalidka aan ilmaha hayn la xiray.
         (e) Isugeynta tirada taakulaynta inta ka harsan jiritaanka amarka waa in ay isbadesho ugu yarraan $2,400.00.

         FIIRO GAAR AH: Ka reebitaanka labada aasaas ee ugu dambeeyay ee lagu qoray xaga sare waa marka amarka uusan lahayn shuruud ah si loo siiyo caynsanaanta caymiska caafimaadka carruurta.

Haddii carruurta lagu qoray liiska amarka ay qaataan gargaar dadweyne ama gargaar caafimaad, sharciyo gaar ah ayaa loo adeegsadaa.

1. DCS waxay si otomaatik ah dib-u eegaysaa amarkaaga ee wax ka badelidda ama isku hagaajinta 35 bilood kasta. DCS waxaa ay dib-u-eegi kartaa amarkaaga taakulaynta waqti ka horreeya 35 bilood haddii waalidka aan ilmaha hayn la xiro.
2. Haddii aad doonaysid in aad wax ka badeshid ama aad isku hagaajisid amarkaaga la'aanta caawimaadda DCS, midkood Xafiiska Xeer-ilaaliyaha Degmada ama DCS waa in ay oggolaadaan shuruudaha amarka ee khuseeya taageerada ilmaha ee loo qoondeeyay gobolka Washington.

**Haddii aad doonaysid in DCS ay dib-u eegis ku sameeyso amarkaaga, waa in aad dhammeystirtid kadibna aad soo celisid bogagga 2 iyo 3 ee foomkan. Eeg tilmaamaha ku qoran bogga 2 ee loogu talogalay shuruudaha dheeraadka ah.**

STATE OF WASHINGTON
DEPARTMENT OF SOCIAL AND HEALTH SERVICES
DIVISION OF CHILD SUPPORT (DCS)

# Codsiga Dib-u Eegista Amarka Taakulaynta Ilmaha

**Child Support Order Review Request**

MAGACA CODSADAHA: LAMBARKA DACWADA:

**Tilmaamaha**

Haddii aad doonaysid in DCS ay dib-u eegis ugu sameyso dacwadaada wax ka badelid ama isku hagaajin suurtagal ah, isticmaali foomkan si aad u wayddiisatid dib-u eegista.

Marka laga reebo saxiixaaga, qor jawaabahaaga. Isticmaal kaliya khad madow ama mid buluug ah.

Saxiix kadibna ku soo celi dhammaan foomamka cinwaanka DCS ee ku qoran bogga 3. Haddii aad tahay wakaalad taakulaysa Ilmaha, wakiil idman waa in uu saxiixaa foomamka.

Soo buuxi kadibna soo celi foomamkan soosocda:

1. **Bogagga 2 iyo 3** ee foomkan.
2. **Xaanshiyada Hawsha ee Jadwalka Taakulaynta Ilmaha ee Gobolka Washington** (ku lifaaqan). Dhammaystir qaybaha loogu talogalay adiga iyo qoyskaaga. DCS waxay isku dayaysaa in ay hesho macluumaadka maaliyadeed ee dhinaca kale.
3. ***Qaraarka Maaliyadeed*** (ku lifaaqan). Dhammeystir foomkan kaliya haddii aad haysatid **amar maxkamadeed**.
4. *Foomka* ***Macluumaadka Qarsoodiga ah*** (ku lifaaqan). Dhammeystir foomkan kaliya haddii aad haysatid **amar maxkamadeed**.
5. *Foomka* ***Waxa dheeraadka ku ah Macluumaadka Qarsoodiga ah*** **(**ku lifaaqan) haddii aad leedahay in ka badan labo carruurood**.** Dhammeystir foomkan kaliya haddii aad haysatid **amar maxkamadeed**.

Ku soo lifaaq dukumeentiyadan soo socda. **Haddii aadan haysan dukumeentiyada, ku soo lifaaq bayaan qeexaya sababta.**

1. Nuqulada labadii ugu dambeeyay ee dakhligaaga canshuur-celinta dowladda dhexe.
2. Nuqulada seddaxdii ugu dambeysay ee gummudyada lacag-bixinadaada.

DCS ama xeer-ilaaliyaha degmada waxaa laga yaabaa in ay la wadaagan wixii dukumeenti ah ee aad u soo diray DCS dhinaca kale ee amarka taakulayntaada waxaana laga yaabaa in ay u gudbiyaan dukumeentiyada faylka maxkamadda dadweynaha.

1. Dhinaca kale ee amarka taakulayntaada wuxuu xaq u leeyahay in uu arko xogtaada maaliyadeed.
2. Waa in aad ka saartaa macluumaadka aqoonsigaaga shakhsi ahaaneed (cinwaanka, taariikhda dhalashada, lambarka dammaanada bulshada) dukumeentiyada kahor inta aadan u dirin DCS.

**Waxaan doonayaa in DCS ay dib-u eegis ku sameyso amarkayga taakulaynta ee wax ka badelidda ama isku hagaajinta sababtoo ah** (calaamadee sanduuqyada hoose ee ku habboon dacwadaada):

1. ☐ Dakhligayga wuu isbadelay.
2. ☐ Dakhliga waalidka kale wuu isbadelay.
3. ☐ Ugu yarraan mid ka mid ah carruurta ku jirta dacwadayda:
   a ☐ Ku nool guri duwan.
   b. ☐ Ma dhiganayo dugsi ama kuma noola gurigga.
4. ☐ Shuruud caymiska caafimaadka ah ayaa loo baahan yahay in lagu daro amarkayga.
5. ☐ Waxaan ahay qof naafo ah, isbitaal ku jira, ama xabsi ku jira.
6. ☐ Sababo kale (bixi faahfaahin): ____________________

Waxaan fahansanahay oo aan oggolahay in:

1. Haddii aanan siinin DCS dhammaan xogta loo baahan yahay, in DCS dib-u eegis kuma sameynayso amarka.
2. DCS waxay kaliya dib-u eegis ugu sameynaysaa dacwadayda si ay wax ugu badesho ama isku hagaajin ugu sameyso bixinyada khuseeya taageerada ilmaha ama caymiska caafimaadka ee loogu talogalay carruurta. DCS awood uma laha in ay dib-u hubin ku sameyso amarada maxkamadda ee loogu talogalay isbadelada haynta, booqashada, ama arrimo kale.
3. DCS waxay isticmaalaysaa xogta aan bixiyo si ay u aasaasto, wax ugu badesho, ama ay u meelmariso taakulaynta ilmo.
   a. DCS waxay ula wadaageysaa macluumaadka hay'adaha kale ee xukuumiga ah kaliya sababo la xiriira ujeeddooyinkan.
   b. DCS waxay u siideynaysaa macluumaadka kaliya sida ay qabaan sharciyada iyo xeerarka gobolka iyo kuwa dowladda dhexe.
   c. Waxaan wayddiisan karaa DCS macluumaadka shakhsiyeed iyo mida qarsoodida ah ee waalidka kale.
4. Kadib marka dib-u eegis lagu sameeyo codsigayga, DCS waxay hore ugu sii gudbinaysaa Xeer-ilaaliye Degmo haddii:
   a. DCS ay hesho dhammaan foomamka iyo macluumaadka lagu codsaday bogga 3.
   b. Dacwadayda waxay gaarsiisan tahay waxyaabaha la isagaga baahan yahay wax ka baddelidda iyo isku hagaajinta.

   FIIRO GAAR AH: DCS dib ula ma noqon karto codsiyada loo diray Xeer-ilaaliye Degmo.
5. Haddii amarkayga uusan buuxinaynin waxyaabaha la isagaga baahan yahay sharicga ama dib-u eegista, DCS ama xeer-ilaaliyaha degmada waxay go'aansan karaan in aysan gaynin amarka taakulayntayda maxkamadda si wax looga badelo ama isku hagaajin loogu sameeyo.
6. Haddii xeer-ilaaliye uu go'aansado in uu sii wado wax ka badelidda ama isku hagaajinta amarka taakulayntayda, taariikhda bilowga ee wixii isbadel ah waxaa laga yaabaa in ay noqoto taariikh kasta laga bilaabo taariikhda tallaabada loo soo gudbiyay maxkamadda ilaa taariikhda garsooraha uu ka saxiixayo amarka. Garsooraha wuxuu go'aaminayaa taariikhda bilowga.
7. Amarka taakulayntayda ee wax laga badelay ama la isku hagaajiyay waxay sababi karaan lacag-bixino taakulayn sarreysa ama hooseysa.
8. Waxaan xaq u leeyahay in aan maxkamad waydiisto in ay isku hagaajiso ama ay wax ka badesho amarka taakulayntayda.

| | |
|---|---|
| TAARIIKH | SAXIIXA WAALIDKA |
| TAARIIKH | SAXIIXA WAKIILKA WAALIDKA |
| | MAGACA QORAN EE WAKIILKA WAALIDKA |

DIVISION OF CHILD SUPPORT
PO BOX 11520
TACOMA WA 98411-5520

Gudaha ______________________ goobta la wacaayo ___________________

Dibadda ______________________ goobta la wacaayo ___________________

Adeegyada TTY/TDD ee loogu talogalay dadka hadalka iyo maqalka dhimman.

Booqo boggeena internetka oo ah: www.dshs.wa.gov/dcs

Qofna sababo la xiriira qoladiisa, midabkiisa, wadanka uu ka soo jeedo, caqiidadiisa, diintiisa, Lab ahaan ama dheddig ahaanta , da'diisa, ama curyaanimadiisa, looguma takoori karo shaqo-qoris, adeegyo, ama aragti kasta ee waxqabadyada barnaamij. Foomkan waxaa loo heli karaa qaabab baddal ah haddii la codsado.

| For Child Support Agency Use Only (Loogu talagalay Kaliya Isticmaalka Wakaalad Taakulayn Ilmo) | | | |
|---|---|---|---|
| AGENCY REPRESENTATIVE'S SIGNATURE | | DATE | |
| AGENCY P.O. BOX OR STREET ADDRESS | CITY | STATE | ZIP CODE |